



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 23, 2021

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Farriinta waqtiga fasaxa waanad mahadsan tahay

Mahadnaqan 'thanksgiving' iyo xilligan fasaxa, wax badan ayaanu rajeynaynaa oo aan u dabaaldegaynaa.

Iyada oo cudurka baahsan uu si daa'iman ah u beddelay nolosheena iyo sida aan iskugu soo ururno, COVID-19 waa mid sidii hore aan la fahmi karin 'mysterious' ka yar ee uu ahaa sanad ka hor. Sayniska ayaa caddeeyay in maaskaraha iyo tallaaladu in ay inaga iyo dadka aan isku dhow nahay ka illaalin karaan infekshanka iyo jirada daran. Inka badan boqolkiiba 70% ee dadka reer Oregon ayaa qaatay ugu yaraan hal qiyaasta tallaalka ah, iyada oo daawooyinka loogu talagalay kuwa qaba COVID-19 ay sii wadaan in hore loo sii horumariyo. Wax badan ayaanu ka warqabnaa oo sii wadnaa in aan la qabsano dabecadaheena marka hore loo socdo.

Marka aad isku timaadaan qoys iyo asxaab maalmaha iyo toddobaadyada soo socda, waxaan rajeynayaa in aad waxoogaa nafis ah ka heli doonto walaaca uu keenay cudurka baahsani. Fadlan illaali kuwa halista sare ugu sugan jirada daran iyo dhibaatooyinka ka dhasha COVID-19, sida dadka la isku dhow yahay, kuwa aad u adeegto ee qaba I/DD iyo kuwa leh xaalado caafimaad oo kale. Halkan waxaa ku qoran talooyinka qaarkood oo loogu talagalay isku imaanshaha waqtiga fasaxa ah iyo badbaadada cuntada:

<https://www.oregon.gov/oha/ERD/Pages/Safe-Holiday-Celebrations-COVID-19.aspx>.

Waxaan u mahad celinayaa dhammaantiin ee sida adag u soo shaqeeyay si ay daryeelaan oo u ilaaliyaan xubnaha bulshada I/DD ee Oregon sanadkani.

Waxaan dhammaantiin idiin rajeynayaa fasaxa Mahadnaqa 'Thanksgiving' oo farxad, ammaan iyo caafimaad leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.